OHAD6.1.2

6/83

QORAAL MAGUURTO L. 6/83

HESHIIS KALA GADASHO GURI DAAR AH IYO XAQUUQDA KU SA-
ABSAN DHULKA UU GURIGAASU KU DHISAN YAHAY.-

JAMHUURIYADDA DIMOQORAADIGA SOOMAALIYA

Maanta oo ah 5ta BishaJanaayo1983, Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed, oo saldhigeedu yahay Muqdisho, Waddada Corso 1-Luuliyo, laguna dhisay Sharciga Lr.8 ee 31kii Jannaayo 1968, loona dhisay inay hormariso dhismaha Guryaha D/Weynaha(Q.C.P.), kuna hormariso dhismo qiimo yar, isla markaasna ay Wasaaradda Maaliyadda hanti ahaan u siisay, khaasna uga dhigtay Wakaaladdaas Dhulka ku yaal Muqdisho, degmada Hodan, Xaafadda Guryaha D/Weynaha ku tilmaaman Decretada Lr.172 ee 14/7/-1972.- - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - -

Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed oo uu Wakiil ka yahay Maareeyaheeda Guud Inj.CABDULQADIR CABDI MAXAMED, waxay ka iibisay kuna wareejisay Jaalle CALI ISMAACIIL - CILMI, oo asaguna Heshiiskaan ku caddeynaya inuu ka - gatay kana aqbalay Wakaaladdaas Guriga Daarta ah, oo ku yaal Muqdisho, degmada Hodan, Xaafadda Guryaha D/-weynaha, kana kooban 2-qol jiif ah, 1-qol jiko, 1-qol musqul iyo Derbi ku wareegsan, kuna dhisan Dhul Dhamanyaale ah, oo Cabirkiisu yahay Mq.200- ; Soohdimihiisuna kala yihiin:-Galbeed waxaa ka xiga X,Xiriirka - Guud ee USS, Waqooyi waxaa ka xiga Guri dad, Bari waxaa ka xiga Guri dad, Koonfurna waxaa ka xiga Guri -

..../...

Lugu diiwaangashay Muqdisho 6/1/83
L. 24 go'aan Qaar Xirmo 24
Lacag dhan Sh. So. 4667180/-
Wakiilka Saxiixay [illegible]

Repno: 84254/MPN/2023, W.DH: (20x10)-M = (200-MQ), Tr. 20/02/2023

dad; Gurigaas qiimaha Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed ay uga iibisay Jaalle CALI ISMAACIIL CILMI, waa Lacag ah Sh.So. 12.958/-(labo iyo toban kun sagaal boqol konton iyo sideed), Lacagtaas oo dhammaanteed uu Gatahu wada siiyey WAKAALADDA DHISMAHA SOOMAALIYEED. - - - -

Sidaas kor lagu soo sheegay darteed waxaa la farayaa Jaallaha haya Buugga Ilaalinta Rahanta ee Maxkamadda Racfaanka Gobolka Benaadir inuu Gurigaas ku qoro Buugga Maguurtada uguna qoro Magaca Jaalle CALI ISMAACIIL CILMI, sida sharcigu qabo. - - - - - - - - - - - - - -

Muqdisho

1)-

2)- Cali Ismaaciil

N. 13918 REB. XAFIISKA NOTAAYAHA MUQDISHO

SAXIIX LA SUGAY

Aniga oo ah Notaayo Dr.MUUSE XUSEEN SADIIQ, ahna Notaayo Xamar, waxaan caddeynayaa in saxiixyada kor ku qorani yihiin kuwii Maareeyaha Guud Inj.CABDULQADIR CABDI MAXAMED, deggan Xamar, Soomaali ah, ee Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed iyo Jaalle CALI ISMAACIIL - CILMI ku dhashay Berbera 1929, deggan Xamar, Soomaali ah, leh W.AQ.58525D.H.Muqdisho, oo Heshiiskaan kala - saxiixdeen. - - - - - - - - - - - - - - - - - - - - -

Muqdisho -5 GEN. 1983 N O T A A Y A H A

(Dr.MUUSE XUSEEN SADIIQ)

QORAAL MAGUURTO L. 6/83

KU/-XAFIISKA ILAALINTA BUUGGA MAGUURTADA EE MAXKAMADDA

RACFAANKA GOBOLKA BENAADIR =MUQDISHO=

L. 6/XVII B. G. N.
L. 6/XVII B. Q. maguurto
L. 6/XVII Tusmada Q. maguurto

UJEEDDO:- KU QOR BUUGGA MAGUURTADA

"LAGA QORE"

1)-WAKAALADDA DHISMAHA SOOMAALIYEED, oo uu ka joogo Maareeyaha Guud Inj. CABDULQADIR CABDI MAXAMED; - - - - - -

"LOO QORE"

2)-CALI ISMAACIIL CILMI ku dhashay Berbera 1929, deggan Xamar, Soomaali ah; - - - - - - - - - - - - - - - - -

Heshiiska Lr. 13918 - Rep. ee 5/1/1983, laguna canshuuray Xamar 6/1/1983, Lr. 24 , Atti Privati, Vol. 24; - oo aan sugay isla aniga Notaayaha ahu ee Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed ay ka iibisay kuna wareejisay Jaalle CALI ISMAACIIL CILMI, Guriga Daarta ah, Lr.-109/68-C., oo ku yaal Muqdisho, degmada Hodan, Xaafadda Guryaha D/weynaha, kuna dhisan Dhul Demanyaale ah, oo Cabirkiisu yahay Mq.200, kana kooban 2-qol jiif ah, 1-qol Jiko, 1-qol musqul iyo Derbi ku wareegsan; Soohdimihiisuna ay ku kala tilmaaman isla qoraalkaas. Sidaas darteed waxaa la faraya Jaallaha haya Buugga Maguurtada ku qoro Gurigaas Daarta ah Jaallaha gatay Magaciisa, sida sharcigu qabo. - - - - - - - - - - - - -

2,40
1,20
2,40
8,00
35,60
8/1/83

Muqdisho -8 GEN. 1983

N O T A A Y A H A

(Dr. MUUSE XUSEEN SADIIQ)